



Arrimo muhiim ah oo ku saabsan tallaalka MMR

MMR waa tallaalka ammaan, wuxuuna bixiyaa difaac heer sare ah oo looga hor tego 3 cudur oo aad halis u ah, kuwaas oo keeni kara dhalmo la'aan, naafo iyo dhimasho: waa Jadeeco, Qaamo-qashiir iyo Rubella.

Dhammaan sadexdan cudur ayaa si fudud u faafa, waxayna sababi karaan dhibaatooyin halis ah. Tusaale ahaan: hadday 5 kune oo qof jadeeco qabaan, hal qof ayaa u dhiman kara xanuunkan.

Jadeecada, qaamo-qashiirta iyo rubella waa laga tirtiray England sababtoo ah dadka intooda badan waa la tallaalay. Balse hadda, maadaama ay dad badan tallaalka MMR iska dhaafeen, cudurradan halista ah, gaar ahaan jadeecada, ayaa mar kale sii badanaya.

1. Tallaalka MMR waa ammaan, oo waxtar badan leh. Wuxuu badbaadiyay malaayiin carruur iyo dadka waaweyn in ka badan 100 waddan, oo ay ka mid yihiin in ka badan 20 milyan oo qof oo reer UK ah.
2. Tallaalka MMR waxa la siin karaa da' kasta oo ka weyn 12 bilood. England waxa lagu bixiyaa laba qiyaasood, inta badan qiyaasta kowaad waxa la bixiyaa marka ay carruurta da'doodu tahay 12 bilood, ka labaadna marka ay jiraan 3 sano iyo 4 bilood. Taas waxaa sabab u ah carruurta yaryari aad ayey ugu xanuunsan karaan jadeecada.
3. Marna wakhti kaama dhicin in aad qaadato tallaalka MMR, waana lacag la'aan (free of charge). Haddii aan lagu tallaalin yaraantii, oo aad qaadanin labada qiyaasood, ama haddii aad aqoonin taariikhdaada tallaalka, waa ammaan inaad qaadato qiyaaso dheeraad ah.
4. Jadeecada, qaamo-qashiirta iyo rubella ayaa si fudud u fida. Haddii aad qorsheyneyso inaad u safarto ama u gurto magaalo kale (tusaale ahaan jaamacad), aad ayey muhiim u tahay inaad qaadato tallaalka MMR.
5. Waa muhiim inaad qaadato tallaalka MMR haddii aad qorsheyneyso inaad qoys dhisto. Qaamo-qashiirta (ama mumps) waxay dhaawici kartaa taranka ragga iyo dumarka. Sidoo kale, haddii haweenay uur leh (xaamilo ah) ay qaado jadeecada ama rubella, canugeeda (ilmaheeda) uurka ku jira wuxuu ku dhalan karaa naafo ama maskax-dhaawac. Ma qaadan kartid tallaalka MMR haddaad uur leedahay, sidaas darteed iska hubi in lagu tallaalay haddii aad ku fikireyso inaad ilmo dhasho.
6. Ma jiro xiriir ka dhexeeya tallaalka MMR iyo cudurka autism (ootisam), mana sababo hadal la'aan ama dib-u-dhacyo kale oo ku yimaada korriinka maskaxda ilmaha. Tallaalka MMR waxa lagu baadhay tiro badan oo cilmi-baadhis ah, waligeedna lama helin xidhiidh ootisamka iyo MMR u dhexeeya. Ootisamku maaha mid uu keenay tallaalka MMR, balse dadka qaar ayaa u dhasha cudurkan caruurta ku dhaca.
7. Nooc ka mid ah tallaalka MMR oo aan lahayn wax hilib doofaar ah ayaa diyaar ah – Waad heli kartaa haddaad rabto.
8. La xidhiidh GP-ga haddii aanad hubin in aad qaadatay tallaalka MMR ee muhiimka ah iyo in kale. Waa la hubin karaan diiwaankaaga tallaalka. Waxa kale oo jiri kara diiwaan ku jira kaydka caafimaadka ilmahaaga ee 'Buugga Cas' loo yaqaan.
9. Fadlan ogow ma qaadan kartid tallaalka MMR haddii aad uur leedahay (xaamila tahay), ama difaacaagu liito, ama daawada neomycin aad u leedahay dareen-celin xasaasiyad ah (allergy to neomycin). La xiriir GP-ga haddii aad walwal qabto.



GP-gu si fudud ayuu idiin siin karaa tallaalka MMR adiga iyo qoyskaaga. Horey u la xiriir si lagu balamiyo. War-bixin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa www.nhs.uk/mmr